# HAWLGALKA QARAMADA MIDOOBAY EE KAALMADA SOOMAALIYA (UNSOM)

Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ayaa taariikhdu markay ahayd 2dii bisha May 2013 soo saaray oo isku raacay Qaraarka tirsigiisu yahay 2102 (2013) ee lagu abuurayo Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Kaalmada Soomaaliya (UNSOM). Hawlgalka sucub wuxuu bedelayaa Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) oo xilkiisa dhammeystiraya 3da June 2013.

**Waa maxay kaalinta UNSOM?**
Kaalinta ugu weyn ee UNSOM waxay noqon doontaa inuu gacan ka geysto abuuridda iyo kicinta jawiga siyaasadeed oo istaraatiji ee lagu heli karo xasillooni iyo nabadayn, oo ay ka mid tahay inuu soo abaabulo qaybaha kale ee Qaramada Midoobay iyo bulshada caalamkaba. UNSOM wuxuu taageeri doonaa ajendaha nabadda, amniga iyo dhismaha qaranka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, wuxuuna dalka ku kaalmeyn doonaa inuu horey u socdo si uu u gaaro doorashooyin xor ah oo xaq ah oo muddo afar sanno ah la qabto. Wuxuu xilkiisa u gudan doonaa iyadoo ay hagayaan mabaadi'da kala ah lahaansho Soomaaliyeed, dabacsanaan, wadashaqayn iyo iskaashi. Wuxuu kaloo gudan doonaa rabitaanka Dowladda oo ah "Irrid keliya ee Qaramada Midoobay oo laga galo", isagoo si gaar ah ula kaashanaya saaxiibada muhimka ah sida Midowga Afrika iyo Urur-Goboleedka IGAD, waxaana hagi doona Siyaasadda Lixda Tiir ee Madaxweynaha iyo Mabaadi'da Busan ee Waxtarka Gargaarka.

**Waa maxay xilka UNSOM?**
Xilka UNSOM waa: bixinta taageero siyaasadeed oo la siiyo Dowladda Federaalka iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ee la xiriirta nabadaynta iyo dhisidda hay'adaha dowladda xagga maamulka, dibu-habaynta laamaha amniga iyo ku dhaqanka sharciga (oo ah ka mid tahay wax ka qabashada dagaalyahanada soo goostay), dhisidda iyo horumarinta hanaanka federaalka (oo ay ka mid tahay u diyaargarowga doorashada sannadka 2016), iyo isuduwidda deeqda caalamiga ah. Sidoo kale, UNSOM wuxuu gacan ka geysan doonaa dhisidda tayada Dowladda Federaalka ee horumarinta iyo dhowridda xuquuqda aadanaha, awoodsiinta haweenka, ilaalinta carruurta, ka hortagga xadgudubyada galmada ee la xiriira colaadda iyo dhibka loo geysto haweenka iyo xoojinta hay'adaha caddaaladda. Sidoo kale, wuxuu ilaalin doonaa, gacana ka geysan doonaa baarista xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha ama sharciga caalamiga ah ee dagaallada iyo baniaadanka ee ka dhaca Soomaaliya, ama xadgudub kasta oo loo geysto carruurta ama haweenka. Wuxuuna warbixin uga gudbin doonaa Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay.

**Waa maxay meelaha uu UNSOM diiradda saarayo?**
Hawlgalku wuxuu diiradda saari doonaa arrimo afar ah:

a) Dhexdhexaadin: taageero loo fidiyo dadaalka dibuheshiisiinta, gacan laga geysto dhexdhexaadinta iyo fududeyn lagu taageero Dowladda si ay uga soo baxdo hawlaha siyaasadeed ee ugu muhimsan, sida dejinta nidaam federaal ah, hanaanka dibu-eegidda dastuurka iyo aftida dastuurka ee xigta; iyo diyaarinta doorashooyinka sannadka 2016;

b) Ku dhaqanka sharciga iyo laamaha amniga: taageero loo fidiyo ujeeddooyinka Dowladda ee mudnaanta leh ee isbedel lagu sameynayo laguna dhisayo hay'adaha Soomaaliya ee amniga iyo garsoorka, iaydoo la siinayo talooyin farsamo la iskuna dheellitirayo dibuhabeynta laamaha amniga, sharciga iyo kala dambeynta (oo ah ka midyihiin ciidanka booliska, garsoorka iyo

ciidanka asluubta), dagaalyahanada soo goostay, hub ka dhigidda, dhaqancelinta, amniga badaha iyo la dagaallanka miinooyinka;

c) Xuquuqda aadanaha: horumarin lagu sameeyo wacyigelinta iyo dhowridda xuquuqda aadanaha iyadoo diiradda la saarayo awoodsiinta haweenka, ilaalinta carruurta iyo ka hortagga xagudubka galmo ee la xiriira colaadda iyo dhibka loo geysto haweenka; in la xoojiyo hay'adaha Soomaaliya ee garsoorka iyo xuquuqda aadanaha; in la ilaaliyo, baaris lagu sameeyo, laga hortago, warbixina laga diyaariyo wax alla wixii ku takrifal ama xadgudub ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee dagaallada iyo baniaadanimada ee ka dhaca Soomaaliya; in la taageero Dowladda si ay u dibueegid ugu sameyso, u hormariso, una hirgeliso shuruucda lagama maarmaanka ah iyadoo raacaysa xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;

d) Isuduwidda kaalmada caalamiga: in la taageero dadaalka ay Dowladdu ugu jirto isuduwidda taageerada deeqbixiyeyaasha, gaar ahaan kaalmada loo fidiyo laamaha amniga iyo amniga, xasilloonida iyo soo kabashada badaha, maareynta maaliyadda guud iyo tayo dhisidda, wada shaqeynta lala yeesho dowladaha iyo ururrada caalamiga ah ee lala yeesho xiriir laba geesood ah iyo mid wadar ahba, iyadoo loo marayo hanaanka Heshiiska Cusub (New Deal).

**Yaa madax u ah UNSOM"**
Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa 29kii bishii April 2013 ayaa Md. Nicholas Kay, (Boqortooyada Ingiriiska), oo aa ah diblomaasi waayoaragtinima dheer u leh Afrika, u magacaabay inuu noqdo Ergeygiisa Gaarka ah ee Soomaaliya iyo madaxa UNSOM. Md. Kay wuxuu higaamin doonaa iskuxirka hawlaha hay'adaha Qaramada Midoobay ee dalka iyo arrimaha mudnaanta u leh UNSOM, wuxuuna isuduwi doonaa hawlaha Qaramada Midoobay iyo Dowladda Federaalka, iyo weliba Midowga Afrika, AMISOM, IGAD, Midowga Yurub iyo urur-goboleedyada kale iyo kuwa caalamiga ah iskaashiga ka dhexaaya. Md. Kay wuxuu bedelayaa Dr. Augustine P. Mahiga, oo ah diblomaasi Tanzaniyan ah, oo soo hayay jagada Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Soomaaliya saddexdii sanno ee la soo dhaafay, xilkiisuna dhammaan doono 3da bisha June 2013.

**Waa xaggee xarunta UNSOM?**
Xarunta UNSOM waxay noqon doontaa magaalada Muqdisho wuxuuna xafiisyo ku yeelan doonaa Soomaaliya oo dhan sida ay codsatay Dowladda Federaalka marka ay xaaladda amaanku saamaxdo. Hawlgalku wuxuu billowga xafiisyo ku yeelan doonaa magaalooyinka Muqdisho, Hargeysa iyo Garoowe, waxaa fafiisyo laga furi doonaa magaalooyinka Baydhabo iyo Beledweyne, iyadoo la eegayo xaaladda amaanka iyo midda qalabka iyo agabka.

**Goormaa UNSOM lagu dhawaaqi doonaa muddo intee dhan buuna jiri doonaa?**
Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ayaa 3dii June asaasay UNSOM muddo billow ah oo 12 bilood ah. Xoghayaha Guud wuxuu Golaha Amaanka ku soo wargelin doonaa hurgelinta xilka UNSOM, oo ay ka mid yihiin tallaabooyinka loo qaaday si loo xaqiijiyo in la helo hawlgal habdhismeed ahaan isku dhafan marka la gaaro bisha Janaayo 2014. Waxaa warbixinta ugu horeysa la soo jeedin doonaa marka la

gaaro 2da bisha September 2013, ka dibna 90kii maalmoodba mar. Golaha Amaanku wuxuu dibueegid ku sameyn doonaa xilka UNSOM marka la gaaro 30ka bisha April 2014.

**UNSOM ma hawlgal nabad-ilaalin baa?**
UNSOM waa hawlgal siyaasadeed oo ay hogaaminayso Waaxda Arrimaha Siyaasadda ee ka tirsan Xoghaynta Qaramada Midoobay. Hase ahaatee, Qaramada Midoobay waxay eegi doontaa inay dejiso hanaan iyo shuruudo loo diyaariyo hawlgal nabad-ilaalin oo laga yaabo in mustaqbalka la keeno, taasoo waafaqsan Qaraarada ku haboon ee uu soo saaray Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay. Ujeeddada ugu weyn waxay tahay mar kasta in ay Soomaalidu amaan u keenaan dadkooda, iyagoon kaalmo dibadda ka helin. Mar kastana AMISOM waxay qayb muhim ah ka tahay dadaalkan.

**Waa maxay kaalinta UNSOM kaga aaddan AMISOM?**
Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2093 (2013) wuxuu ku nuuxnuuxsaday baahida loo qabo inay Qaramada Midoobay si isku xiran ula shaqayso AMISOM. UNSOM wuxuu xoojin doonaa iskaashiga istaraatiji ee ka dhexeeya Qaramada Midoobay iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM). Labada hay'adoodba waxay kaalin ka cayaarayaan taageerada loo fidiyo nabadaynta Soomaaliya. Marka la sameeyo UNSOM, isla markiiba labada hay'adood waxay ka wada shaqayn doonaan arrimaha ay dhab ahaantii iska kaashanayaan hawsha ay ka hayaan dalka.

**Waa maxay kaalinta UNSOM kaga aaddan hay'adaha Qaramada Midoobay?**
Waxaa 1da bisha Janaayo 2014 la asaasi doonaa jagada Ku-Xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud/oo ah Isuduwaha Arrimaha Gargaarka Baniaadanimo, oo habdhisma ahaan loogu soo dhafi doonaa UNSOM. Dhammaan 11ka hawl ee hay'adaha Qaramada Midoobay ee dalka ayaa si buuxda loogu xiriirin doonaa UNSOM, taasoo ay ka midtahay iyadoo la sameynayo kooxo wadajir ah iyo istaraatijiyo wadajir ah, iyadoo isla markaana la xaqiijinayo baniaadanimada, eexasho la-aanta, dhexdhexaadnimada iyo madaxbanaanida kaalmada baniaadanimo. UNSOM wuxuu xaqiijin doonaa iswaafaqsanaan dhexmarta hay'adaha Qaramada Midoobay ee dalka marka la eego xasilloonida iyo soo kabashada goobihii dhowaan la xoreeyay, arrimaha amniga badaha, arrimaha dhaqaale ee ka dambeeya colaadda iyo tayo dhiska. UNSOM wuxuu ku tiirsanaan doonaa hay'adaha Qaramada Midoobay si taageero barnaamij loogu dhafo talooyinkiisa siyaasadeed iyo kuwa istaraatiji, iyadoo la xaqiijinayo in la ilaaliyo gargaarka baniaadanimo.

**Waa maxay kaalinta UNSOM kaga aaddan UNSOA?**
Marka la gaaro 3da bisha June 2013, UNSOA waxaa lagu soo dhafi doonaa hanaanka UNSOM. Agaasimaha UNSOA wuxuu warbixintiisa ku aaddan taageerada UNSOM ee adeegga lojistikada/saadka iyo su'aalaha siyaasaddaba u gudbin doonaa Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud, isagoo islamarkaana warbixintiisa ku aaddan gaarsiinta taageerada AMISOM ee adeegga lojistikada/saadka u gudbin doona Waaxda Taageerada Hawlgallada Dalalka (ee Qaramada Midoobay).

# HAWLGALKA QARAMADA MIDOOBAY EE KAALMADA SOOMAALIYA (UNSOM)

**Maxaa loo kala dirayaa UNPOS?**
The dhammaadka xilligii ku meelgaarka ee Soomaaliya waxaa ka dhashay waa cusub oo u baryay Soomaalia. Kaalinta UNPOS, oo la asaasay sannadkii 1995, waxay ahayd inuu bixiyo taageero dhexdhexaadi si loo gaaro in dowlad sharci ah laga dhiso magaalada Muqdisho. Markii la dhaariyay madaxweynaha cusub oo uu dhammaaday xilligii ku meerlgaarka, hawshii Xafiiska Siyaasadda halkaas bay ku dhammaatay.

Golaha Amaanku wuxuu ogolaaday (Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay 2093, 6 Maarso 20013) talooyinkii uu soo jeediyay Xoghayaha Guud oo ahayd in UNPOS uu ka soo baxay xilkii loo igmaday markaa waa in la xiro laguna bedelo hawlgal siyaasadeed oo cusub oo ballaaran, sida ugu dhakhsiyaha badan. Talooyinka  Xoghayaha Guud waxay soo baxeen ka dib markii la sameeyay Dibueegid Istaraatiji ee joogitaanka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, oo dhhammaan dadkii lala hadlay waxay Qaramada Midoobay ugu baaqeen inay xoojiso joogitaankeeda Soomaalia si loo xoojiyo guulihii laga gaaray xagga amniga lana maalgashado mustaqbalka dalka iyadoo taageero buuxda la siinayo nabadaynta ay Soomalidu leedahay.

**UNSOM maxay uga duwantahay UNPOS?**
Kaalinta ugu weyn ee UNPOS waxay ahayd inay gacan ka geysato dhexdhexaadin, horumariso wadahadal siyaasadeed ayna fududeyso sameynta dowlad sharci ah, oo salballaaran, oo dadka wada metesha. Iyadoo qabanaysa mas'uuliyaddan, UNPOS waxay kaalin wax ku ool ah ka qaadatay inay Dowladda Federaalka Ku-Meelgaarka ku kaalmeyso talooyin istaraatiji ah, isuduwidda gargaarka, tababarka iyo tayadhiska hay'adaha amniga ee dhowaan la unkay. Ka dib markii la qabtay doorashadii madaxweynaha ee bishii September 2012, Soomaaliya waxay gashay waa cusub ee xagga siyaasadda iyadoo heshay dowladdaii ugu horeysay ee sharci ah oo si hufan oo daahfuran loo soo xulay tan iyo sannadkii 1990. Hawlgalka cusub waxaa weli sii hogaamin doona Waaxda Arrimaha Siyaasadda ee Qaramada Midoobay ee saldhigeedu yahay magaalada New York. Hase ahaatee, Hawlgalku wuxuu dejinayaa hanaan ay Qaramada Midoobay si guud ah ugu hawlgeleyso laakiinse diiradda saaraya ujeeddooyin gaar ah, iyagoo si toos ah u taageeraya hay'adaha taagta yar ee Dowladda Soomaaliya ee cusub, iyagoo isla markaana fududeynaya geeddisocodka dimuqraadiyadda, oo ay ka mid tahay ansaxinta qaby-qoraalka Dastuurka iyo in doorasho qaran oo xor ah oo xaq lagu qabto muddo afar sanno ah.